



Fariintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 27, 2021-ka

Ku socota: Hawl wadaagayaasha ODDS iyo Daryeel Bixiyayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Heerarka COVID-19 iyo dhimashada hooyada oo kor u sii kacaysa

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa dhawaan qabtay kulamada dhanka internet-ka oo loogu talagalay daryeel bixiyayaasha kaasi oo ku saabsanaa xeerka shuruudaha tallaalka ee shaqaalaha cusub ee Maamulka Caafimaadka Oregon.

Isaga oo qayb ka ahaa kulamada dhanka internet-ka, waxaanu ka codsanay Dr. Dawn Mautner, oo ah la talisada sare ee caafimaadka oo la shaqeysa Kooxda Ka jawaabida iyo Ka soo kabashada COVID, si ay uga hadasho waxyaabo ku saabsan saameynta COVID-19, gaar ahaan la xiriira nooca delta ee sida aadka ah la isku qaadsiiyo.

Dr. Mautner hadal soo jeedinteedii hadda waxaa laga helayaa [internet-ka](#) waxaan qof kasta oo ka tirsan nidaamka adeega I/DD si aad ah ugu dhiirigelinayaa in uu fiirsado ama dhageysto fiidiyowga. Dr. Mautner ayaa ka jawaabtay su'aalo ka socday guriga dadka waayeelka ah ee I/DD iyo daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay. Waxay soo bandhigtay qiyaaso naxdinta leh, oo gaar ahaan ku saabsan heerka sii kordhaya ee infekshanada halista ah ee COVID-19 iyo dhimashada dadka dhallinyarada ah ee Oregon oo dhan. Xogta carruurta ee loogu talagalay dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 18 jir ayaa laga [helayaa internet-ka](#).

[Qiyaasahani](#) sidoo kale waa kuwo run ah marka la eego dhanka nidaamka naafanimada maskaxda ama korriinka, iyada oo nooca cudurka delta uu faro baas ku hayo bulshooyinkeena. Dadka reer Oregon oo badan oo qaba

I/DD ayaa dhintay Ogoosto 2021 marka loo eego Janaayo, Febraayo, Maarso iyo Abriil 2021 oo la isku daro.

Ka hor nooca cudurka delta, celceliska dhimashada da'da ee nidaamka I/DD wuxuu ahaa 66 jir. Hadda celceliska da'du waa 40 jir.

Iyada oo aan la eegayn da'da, dhimasho kasta oo ku timaada qof qaba I/DD waa musiibo. Waxaan ka ognahay xogta qaranka in dadka qaba I/DD ay u badan tahay in ay yeeshaan jiro daran ama dhimasho haddii ay qaadaan COVID-19. Sidaa darteed, sidii hore in ka badan ayay muhiim u tahay in la qaato tallaalka si loo ilaaliyo qoysaskeena, asxaabteena, iyo dadka ku jira nidaamkeena adeeg. Macluumaadka tallaalka iyo ilaha [ayaa la helayaa](#).

Fadlan naga caawi taageerada dadka qaba I/DD si ay u noqdaan kuwo ammaan ah iyo caafimaad leh. Waad ku mahadsan tahay had iyo jeer shaqadaada adag iyo dadaaladaada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.